

TEACHING STRATEGIES GOLD (XEELADA DAHABIGA AH EE WAX BARISTA) (TS Gold)

Qiimeynta waxay siisaa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natiijooyinka qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Teaching Strategies (TS) Gold waa imtaxaan joogto ah, oo kormeer kusalaysan lagana qaado ardayda kujira dugsiga barbaarinta iyo kuwa dhigta dugsiga caruurta. Macalimiintu waxay kormeraan caruurta kujira fasaladooda khibradooda maalin kasta si ay ugo'aanshaan waxay ilmuhu yaqaanaan iyo waxa ay samayn karaan, iyo awoodahooda, baahiyahooda iyo waxyaabaha ay xiiseeyaan ayagoo ka eegaaya 6 qaybood ee waxbarashada iyo kobaca: Dareenkooda Bulsho, Jireed, Luuqada, Fahanka, Aqoonta luuqada iyo Xisaabaadka (Barashada Luuqada Ingiriiska markii loo baahdo). TS Gold wuxuu buuxiyaa shuruudaha gobalka ee Imtaxaanka Diyaar Ahaanshaha Caruurta yaryar.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Arday kasta oo kujira dugsiga barbaarinta ayaa lakormeeyaa si joogto ah, macluumaadka uu soo aruusho macalinka ardaygaaga ayaana lasoo gaba gabaynayaa 3 jeer sanad kasta si waafaqsan xiliyada kama danbaysta ah ee gobalku udajiyay. Arayda dugsiga caruurta kujira si joogto ah ayaa loo kormeerayaa inta lagu jiro 60 maalmood ee ugu hoseeya dugsiga macluumaadkana waxaa lasoo gudbinayaa halmar sanadkiiba si waafaqsan jadwalka gobalka. Dugsiyadu waxay go'aansan karaan haday doonayaan inay siiwadaan adeegsiga xeeladaha TS Gold markay imtaxaanayaan ardayda fasalka koobaad dhamaan inta kadhiman sanadka si ay ula socdaan hormarka ardaydu sameeyaan. Maadaama qaabkaan yahay mid kudhisna kormeeris, waqtiga aan casharada ladhigayn ayaa loo adeegsadaa in laqaado imtaxaanka.

Xiliyada Kama danbaysta ah ee Soo gudbinta Natiijada

Oktoobar

Janaayo

Maajo



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Natiijooyinka imtaxaanku waxay cabiro muhiim ah kabaxshaan inta ay le'egtahay dadaalka ardaygaagu kubaranaayo fikradaha iyo xirfadaha udagsan heer kasta si markaas ardaygaagu guul uga gaaro fasalkiisa ama keeda ay hadda dhigato uuna usii wado hormarka dhanka aqoonta laga bilaabo sanad ilaa sanadka kale.

Hanaanka TS Gold, cabirka qiimaynta ayaa loo adeegsadaa si loo cabiro heerka ardaygaagu kagaaray hormar gaar ah oo hinacyada kobaca iyo waxbarashada ah. Tani waxay gacan kagaysanaysaa in ardaygu galo heer kahooseeya, kuhaboon ama kabadan himilooyinkii laga rabay ee kudhisnaa cilmi baarista ee loo asteeyay da'diisa iyo fasalkiisa gaarka ah.



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Natiijooyinka imtaxaanka TS Gold ayuu u adeegsadaa macalinka cunugaagu inuu go'aansado waxa cunugaagu yaqaano uuna samayn karo iyo sida ay arintaasi ula xariirto yoolalka muhiimka ah ee kobcinta iyo waxbarashada. Macalimiinta ayaa sidoo kale gardaadin kara waxbarashada cunugaaga oona hubin kara hormarka la sameeyay ayagoo macluumaadka laga helay imtaxaankaan. Buundooyinka cunugaaga waa laguusoo gudbinayaa inta lagu jiro shirarka macalinka iyo waalidka. Xarumaha Waxbarashada Caruurta aya u adeegsada buundooyinka TS Gold qayb kamid ah cabirka hufnaanta Dukumiintiyada Shaqada Dugsiga.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- <http://assessments.dpsk12.org>

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.